## Kulannada Guddiga Dugsiga Waxaad Ka Noqotaa Muwaadin Firfircoon

Waxaad ka qayb qaadan kartaa dejinta nidaam hawleedka maamulka dugsiga ee degmadaada adigoo ra'yigaaga u gudbinaayo xubnaha ka tirsan guddiga dugsiga.

**Waxaad soo qaadataa ajeendada kulanka.** Waxaa ajeendada dadweynaha loo soo bandhigaa 24 saac ka hor kulanka ay isugu imaanayaan guddiga dugsiga. Waxaad ajeendada ka heli kartaa bogga internetka ee maamulka dugsiga ee degmada.

**Waxaad qorsheysaa in aad ka hadashid** kulanka guddiga. Kulannada joogtada ah ee guddiga dugsiga caadi ahaan waa fursad ay dadweynaha kula bixi karaan ra'yigooda. Guddiyo badan ayaa qabaan xaashida la isku xaadiriyo ee yaal agagaarka albaabka laga soo galo ee qolka guddiga.

**Waxaad guddiga dugsiga uga wakiil noqotaa koox** bulshada ka tirsan. Waxaad kooxdaada wargelisaa tallaabooyinka guddiga.

**Waxaad fiirsataa kulannada laga soo daayo** telefishinka, ama waxaad weydiisaa xafiiska degmadaada haddii ay jirto liiska e-mailada dadka xiiseeya akhbaarta guddiga dugsiga.

**Qoraal ama taleefoon u soo dir** wakiilkaaga ka mid ah guddiga dugsiga si ra'yigaaga loo ogaado.

Dhammaan kulannada guddiga waa mid dadweynaha u furan aan ka ahayn marka mawduucu ku saabsan yahay hanti maguurto ah, arrimaha shaqaalaha, dacwad taagan, wada xaajoodka heshiisyada, ama dacwad dhageysi rasmi ah.

## Sida uu u Dhisan Yahay Maamulka Dugsiga ee Degmada

**Guddiga Dugsiga**
Waxaa soo doortaan dadweynaha si ay u dejiyaan ujeeddada, u qabtaan qorsheynta istaraatejiyadda, shaqaaleynta iyo in ay dusha kala socdaan u xilsaaranaha, sameynta miisaaniyadda maamulka dugsiga ee degmada iyo qaab hawleedka.

↑

**U Xilsaaranaha**
Waxaa shaqaaleeyaan guddiga dugsiga si uu u maamulo maamulka dugsiga ee degmada.

↑

**Maamulaha**
Waxaa uu hoos yimaadaa u xilsaaranaha. Waxaa uu maamulaa shaqaalaha iyo ardayda iyo hawlo maalmeedka dugsiga.

↑

**Macallimiinta**
Waxaa ay hoos yimaadaan maamulaha.

**Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka Waxbarashada**
**Office of the Education Ombuds**

**Khadka Bilaashka Ah: 1-866-297-2597**
**Faakis: 21-844-886-5196**

**www.oeo.wa.gov**

Waxaad la soo xiriirtaa Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada haddii aad doonaysid in aad heshid dukumeentigan oo noocyo kale ah ee loogu talagalay dadka naafada ah.

Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka Waxbarashada waxaa uu siiyaa ardayda, qoysaska iyo bulshada macluumaadka ku saabsan nidaamka waxbarashada dadweynaha, waxaana ay dhiirigeliyaan ka qayb qaadashada waxbarashada ee qoysaska iyo bulshada, waxaana uu ka caawiyaa qoysaska iyo ardayda xal u helidda khilaafaadka dugsiyada ku saabsan.



# Waa Maxay Hawsha ay Qabtaan Maamulka Dugsiga ee Degmada? How Does a School District Work?

Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka Waxbarashada
Office of the Education Ombuds
**Tilmaamaha Qoyska**
**A Guide for Families**

Washington State Governor's Office of the Education Ombuds
*We listen. We inform. We help solve problems.*

Gobolka Washington
Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka
State of Washington
Office of the Governor

**Somali**

# Aragtida Guud

Daraasadaha waxay muujiyeen in ardayda ay dugsiga ku fiican yihiin marka waalidiintooda ay qayb lixaad leh ka qaataan waxbarashadooda. Caadi ahaan ka qayb qaadashadu waxaa ay macnaheedu tahay in laga caawiyo daruusta guriga ama la xiriiridda macallinka ilmahaaga, hase ahaatee ka qayb qaadashadadu waa mid fasalka ka sare mari karto. Marka aad arrin ahmiyad siinayso, talo ama su'aal la xiriirta waxbarashada ilmahaaga, waxaa ku caawinaaya in aad fahansan tahay sida ay u wada shaqeeyaan fasalka ilmahaaga iyo dugsiga iyo nidaamka sare ee maamulka dugsiga ee degmada. Buug gacmeedkaan waxaa uu kuu fasiraayaa sida ay u dhisan yihiin maamulada dugsiyada ee degmooyinka.

## Maamulada Dugsiyada ee Degmooyinka ee Gobolka Washington

Washington waxaa ay qabaan qiyaastii 300 ah maamulada dugsiyada ee degmooyinka, iyadoo uu mid waliba qabo guddiga dugsiga oo la soo doorto. Degmooyinka waxaa ka tirsanaan kara hal dugsi ama, Seattle gudaheeda, waxaa hoos yimaad in ka badan 100 dugsi.

## Yaa ka Mid ah Maamulka Dugsiga ee Degmada

**Guddiga dugsiga.** Dadweynaha ka tirsan degmada dugsiga ayaa soo doorta xubnaha guddiga dugsiga. Wadajir ayeey xubnuhu u leeyihiin hadalka kama dambeysta ah ee ku saabsan qaanuunada, nidaam hawleedka iyo miisaaniyadda. Guddiga dugsiga ayaa degmada xukuma.

**U xilsaaranaha iyo shaqaalaha maamulka dugsiga ee degmada** waxaa ay kala shaqeeyaan maamulaha dugsi kasta sida loo agaasimaayo hawlo maalmeedka iyo waxbarashada carruurta. Guddiga dugsiga ayaa jiheeya hawlaha uu qabto u xilsaaranaha.

| U Xilsaaranaha | Guddiga Dugsiga |
|---|---|
| Waxaa shaqaaleeyaan guddiga dugsiga | Dadweynaha ayaa soo doorta |
| Waxaa uu maamulaa hawlo maalmeedka | Waa kuwa xukuma, oo jiheeya |
| Qaanuunada ayuu fuliyaa | Waxaa ay soo saaraan qaanuunada iyo qorshooyinka |
| Waxaa awoodda siiyaan guddiga dugsiga | Awoodda ay leeyihiin waa mid koox ku kooban |

# Aasaaska Guddiga Dugsiga

Xubnaha guddiga dugsiga waxaa kaloo loo yaqaan agaasimeyaal. Waxaa guddiga dugsiga ku jira shan xubnood aan ka ahayn degmada gobolka ugu weyn, Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle, oo ay toddoba xubnood guddiga ku jiraan.

Xubnaha guddiga dugsiga:

- Waxaa sanad dhaaf u soo doortaan dadweynaha ka tirsan maamulka dugsiga ee degmada (sanooyinka ay tiradoodu kisiga tahay).
- Waxaa ay qabtaan muddooyin isdhaafsan. Jagooyinka oo idil ma aha kuwo ay doorashadu u bannaan tahay.
- Degmooyinka qaarkooda waxaa ay siiyaan kharash yar oo maalintii ah, iyadoo agaasimeyaasha degmooyinka kale loo celiyo kharashyada ka gala oo kaliya. Waxaa go'aankan leh qaanuunka guddiga.
- Waxaa suuragal ah in doorashadu ay noqoto "mar oo kaliya," ama laga soo doorto xaafado degmada ka tirsan. Agaasime kasta waxaa uu ka wakiil yahay danaha ardayda degmada oo idil.
- Waxaa ay haayaan muddo afar sano ah (aan ka ahayn Spokane, Tacoma iyo Everett, kuwaasoo haaya muddo lix sano ah).

## MAS'UULIYADDA GUDDIGA

- Sameynta aragtida guud iyo ujeeddooyinka maamulka dugsiga ee degmada.
- Qorshaha istaraatejiyadda.
- Shaqaaleynta u xilsaaranaha.
- Kormeerka guud iyo qaanuun dejinta.
- Oggolaashada iyo la socodka miisaaniyadda degmada iyo qorshooyinka waxbarashada.
- Ka wakiil noqoshada cod bixiyeyaasha bulshadooda ka tirsan.

## YAA KA MID NOQON KARA GUDDIGA DUGSIGA?

Jagada maamulaha dugsiga waxaa uu u bannaan yahay qof waliba oo ah cod bixiye ka diiwaan gashan maamulka dugsiga ee degmada. Musharraxa waa in uu soo bandhigaa maaliyadda islamarkaana uu ku guuleystaa doorashada guddiga dugsiga.

# Macallimiinta, Maamuleyaasha iyo Xubnaha Kale ee Shaqaalaha

Qofka u horreeya ee aad dugsiga kula kulantid waxaa ay u badan tahay in uu yahay macallinka ilmahaaga, qofka sida tooska ah ugu hawlan waxbarashada ilmahaaga. Macallimiinta fasallada waa bareyaal islamarkaana qiimeeya ardayda si ay uga caawiyaan gaaritaanka heerarka u degsan manhajka dugsiyada.

Horjoogaha macallimiinta waa maamulaha dugsiga, oo ay mas'uuliyaddiisu tahay: Maamulka hawlo maalmeedka dugsiga iyo dhammaan ilaha dhaqaalaha iyo shaqaalaha, in uu shaqaalaha horumar gaarsiiyo si loo kordhiyo waxbarashada ardayga, qiimeynta shaqaalaha dugsiga iyo barnaamijyada, iyo sameynta xiriir kala dhaxeeya waalidiinta iyo bulshada. Waalid ahaan, waxaa lagugu soo dhaweynayaa in aad la kulantid maamulaha ardaygaaga.

Shaqaalaha dugsiga waxaa ka mid noqon kara ku xigeenka maamulaha, xoghaynta dugsiga, kaaliyeyaasha macallimiinta, shaqaalaha maktabadda, lataliyeyaal, shaqaalaha taageera reerka iyo turjubaano.

Macallimiinta badankooda iyo qaar badan oo ka tirsan shaqaalaha maamulka dugsiga ee degmada waxaa ay ka tirsan yihiin ururrada shaqaalaha. Ururrada shaqaalaha ayaa wada xaajood kala yeesha maamulka dugsiga sameynta heshiiska qeexaya xaaladaha shaqada iyo mushaharka iyo dejinta jadwalka sanad dugsiyeedka ee maalmaha uu dugsiga furan yahay iyo fasaxyada dugsiga. Shaqaalaha waa in la soo shaqaaleeyo ama ruqseeyo sida waafaqsan qoddobada heshiiska.

# Maaliyadda Maamulka Dugsiga ee Degmada

Maaliyadda maamulka dugsiga ee degmada waa mawduuc dhib badan, sababtoo ah lacagta waxaa ay ka timaad meelo kala duwan caadi ahaana waxaa loo isticmaali karaa ujeeddooyin cayiman. Tusaale ahaan, haddii cod bixiyeyaasha maamulka dugsiga ee degmada ay ansixiyaan canshuur dib loogu habeynaayo fasallada, guddiga dugsiga ma ay go'aamin karaan in ay lacagtaas u adeegsadaan kharashyada buugaagta iyo mushaharrada macallimiinta.

Guddiga dugsiga waxaa ay go'aamiyaan halka u xilsaaranaha iyo shaqaalaha ay u isticmaalayaan lacagta degmada. Sida ay guddiga dugsiga u qoondeeyaan maaliyadda waxaa uu kuu sheegayaa waxyaabaha guddiga ay aad u qiimeeyaan. Fahanka kharashyada maamulka dugsiga ee degmada waxaa uu ra'yi kaa siinayaa waxa ka dhaca maamulka dugsiga ee degmada, kaasoo kaa caawinaya in aad wakiilllada ka tirsan guddiga dugsiga siisid talooyin ku saleysan xogta jirta.

## HALKEE LACAGTA KA HELAAN MAAMULKA DUGSIGA EE DEGMADA?

- 70% gobolka.
- 10% dawladda dhexe iyo barnaamijyo gaar ah.
- 16% canshuurta laga qaado hantida deegaanka sida ay ansixiyaan cod bixiyeyaasha.
- 4% meelo kale sida gobolka, dawladda dhexe ama deeq gaar ah.

## YAA GO'AAMIYA SIDA LOO ISTICMAALAYO?

- Guddiga dugsiga ayaa soo xusha ujeeddooyinka iyo sida ay u kala muhiimsan yihiin.
- U xilsaaranaha iyo shaqaalaha ayaa soo sameeya qorshe misaaniyadeed.
- Guddiga dugsiga ayaa ansixiya miisaaniyadda kaddibna kormeera isticmaalkeeda.
- Cod bixiyeyaasha saameyn ayeey ku leeyihiin qaab hawleedka sababtoo ah waxaa ay soo doortaan guddiga dugsiga.

## WAA MAXAY CANSHUURTA?

Canshuurta waa lacagta degmada oo loo isticmaalo bixinta kharashyada maamulka dugsiga ee degmada. Milkiileyaasha hantida maguurtada waxaa ay bixiyaan qayb lagu saleeyey qiimaha hantida maguurtada ah. Lacagta waxaa suuragal ah in oo isticmaalo dayactirka iyo hawl fulinta, kharashyada raasumaalka ama gaadiidka.

## WAA MAXAY SHAHAADADA LACAG CELINTA?

Shahaadada lacag celinta waa qaab ay maamulka dugsiga ee degmada lacag ku amaahdaan. Waa in ay ansixiyaan cod bixiyeyaasha, oo canshuurta hantidooda laga qaato lagu bixin doono amaahda iyo dulsaarkaba.